

SHARCIGA ALAARMIGA DABDAMISKA EE NSW

Fact Sheet 11A – Community Risk Management. Revised 25/11/2005 - Somali

- NSW FIRE BRIGADES
- NSW RURAL FIRE SERVICE
- ACT FIRE BRIGADE
- ACT RURAL FIRE SERVICE

XAQIIQADA

Mey 1,2006, dhammaan deganayaasha NSW waa in ugu yaraan hal alarmi oo dabka sheegaa oo shaqeynayaa guryahooda ku rakiban yahay kuwaan waxaa ku jira guryaha ijaarka ah, guryaha qofka degani uu iska leeyahay, iyo guryaha ku meelgaarka ah.

Mawqifka Dabka Damiska NSW ee alarmiga dabka sheega:

- Dhammaan alarmiyada lagu dhajiyay guryaha degaanka ah ee NSW waa inay lahaadaan shuruudaha **AS 3786** ama **AS 12239**
- Alaarmiyada waxaa loogu dhajiyaa sida waafaqsan tilmaanta warshadda soo sameysay, waxaana loo meeleeeyaa si waafaqsan habka dhismaha ee Australia iyo tilmaanta warshadda soo sameysay
- Alaarmiyada sida adag loo xiray ayaa la door bidaa, maadama alaarmiga dabku uu ku tiirsan yahay dabka batteriga awoodiisu tahay 9 volt haddii si fiican loo xiro loona bedelo
- Alaarmiga guryaha ah class 1 buildings waxay ku yaallaan qolalka jifka banaankooda iyo meelaha la maro ee u dhexeeya qolalka seexashada iyo halka laga baxo ee dibadda u furan
- Alaarmiga dhismayaasha ka kooban 2 ama in ka badan oo guryo kala go'an ah, sida guryaha unityada ah, waxa ay ku yaallaan banaanka qolalka jifka iyo meelaha la maro oo dhan inta u dhaxaysa qolalka jifka iyo meesha looga baxo korodooyada la isla wadaago
- Alaarmiyada ku yaal guryaha dhowrka dabaqa ah, marka lagu daro sharciga kore, waxay ku yaalliin meesha la maro dabaq walba guryaha dhowrka dabaqa ah
- Xaqiiji in alaarmiga dabku ku yaallo meel aan dhibaato u keenayn si looga fogaado in dhibaato uga timaado shaqada qaboojiyaha, kulayliyaha, faananka iyo aalladaha kale ee kantaroola xaallada hawada
- Hadday suurtagal tahay ku dheji photo-electric iyo kuwa loo yaqaan ionisation smoke alarms
- Masuuliyada ku dhejintu waxay saaran tahay kan leh dhisida, kuwaas oo ay ku jiraan, marka laga ijaarayo qolada guriga leh
- Mid awoodiisu dhan tahay 240 volt oo ah kan sheega dabka ayaa waxaa ku dhejinaya koronto yaqaan aqoon leh, waxaana laga yaabaa in lagu rakibo batteri awoodiisu dhan tahay 9 volt uuna ku rakibo qof aqoon u leh kaas oo aan ahayn koronto yaqaan
- Guryaha ku meel gaarka ah kuwaas oo aan helli karin 240 volt mid awoodiisu dhan tahay haddaan la helli karin ama suurtagal ahayn (sida teendhahda, doonyaha, karafaanka) waxaa laga yaabaa in isticmaalo alaarmiga batteriga ku shaqeeya
- Degaanka ku meel gaarka ah, alaarmiga dabka waa in lagu rakibaa meelaha aan muuqan oo dhan
- Sharcigu wuxuu u ogolaanayaa qofka guriga leh ama wakiilka guriga inay galaan guriga oo ku rakibaan alaarmiga dabka waxaase shardi ah in la siiyo qofka guriga degan ugu yaraan 2 berri oo ogeysiin ah
- Qofka guriga leh ayaa masuul ka ah bixinta alaarmiga iyo batteriga iyo rakibidooda
- Kiraystayaashu waxay masuul ka yihiin dayactirida alaarmiga dabka. Kuwaan waxaa ku jira tijaabinta iyo nadiifinta

MACLUUMAAD I NTAAS KA BADAN LA XIRIIR DAB DAMISKA AGTAADA AH AMA XARUNTA KANTAROLIDA DABKA

ama booqo: www.fire.nsw.gov.au www.rfs.nsw.gov.au